BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka Dabeysha (Polio)

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Ka eeg www.immunize.org/vis.

Hojas de Información Sobre Vacunas están disponibles en español y en muchos otros idiomas. Visite http://www.immunize.org/vis

1 Waa maxay cudurka dabeyshu (Polio)?

Cudurka dabeyshu waa cudur u keeno fayras. Wuxuu jirka ka galaa afka. Sida caadiga ah ma keeno cudur halis ah. Laakiin mararka qaardood waxay sababtaa baaralaato (gacanta ama lugta oo aan la dhaqaajin karin), waxayna keeni kartaa meninjaaytis (xajiimoodka dahaarka maskaxda). Wey dili karataa dadka ay ku dhacdo, badiyaa iyada oo baaralaato ku rida muruqyada qofka ka caawiya neefsashada.

Dabaysha ayaa ka ahaan jirtay wax caadi ah Mareykanka. Waxay naafayn jirtay oo dili jiray kumanaan qof sannadkiiba kahor inteynaan yeelan tallaalka.

2 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Tallaalka fayraska dabaysha (polio) ee aan nooleyn (IPV) ayaa ka hortagi kara cudurka dabaysha.

Taariikhda: Cudurka dabaysha (polio) oo safmar ahaa 1916 gudaha Mareykanka ayaa dilay 6,000 oo qof oo baaralaato ka dhigay in ka badan 27,000. Horrantii 1950-yihii waxa jiray 25,000 xaalado dabaysha ah (polio) oo laga warbixiyay sannad kasta. Tallaaalka dabaysha waxa la bilaabay 1955. Markii la soo gaaray 1960-kii tirada xaaladaha laga warbixıyay ayaa hoos ugu dhacay illaa 3,000, markay noqoteyna 1979-kii waxa jiray kaliya illaa 10 xaaladood. Ku guuleysiga tallaalka cudurka dabaysha ee Mareykanka gudihiisa, iyo dalalka kale ayaa kiciyay dadaal loogu jiro adduunka oo idil sidii looga tirtiri lahaa cudurka dabaysha.

Maanta: Cudurka Dabaysha waa laga tirtiray Mareykanka. Laakiin cudurku wuxuu ka jiraa meelo qaarkood oo adduunka ka tirsan. Waxaa ku filan hal qof oo fayrasta dabayshu hayso oo ka yimid dal kale inuu dib ugu soo celiyo cudurka halkan haddii aanaynu tallaalka kahortagga lahayn. Haddii dadaalka loogu jiro in dunida laga baabi'yo cudurkan lagu guuleysto, markaa uma baahan doono dabaysha tallaalkeeda. Haddaba illaa ay sidaas ahaato, waa inaan u sii wadna tallaalka carruurteena.

3 Yaa tahay inay qaataan tallaalka cudurka dabaysha iyo goorma?

IPV waa talaal, qofka laga siiyo lugta ama gacanta, iyada oo ku xiran da'da. Waxa la siin karaa xilli la mida marka tallaallada kale la siinayo.

Carruurta
Carruurta ayaa la siiyaa 4 qiyaas tallaalka ah, da'ahan:
- Qiyaas tallaal markay yihiin 2 bilood
- Qiyaas tallaal markay yihiin 4 bilood
- Qiyaas tallaal 6-18 bilood
- Qiyaas xoojin ah 4-6 sano

Tallaalo "isku jira" (dhowr tallaalo kala duwan oo ah hal duritaan) ayay ku jirtaa IPV. Carruurta heleysa tallaalladan ayaa heli karta hal qiyaas dheerad ah (5-aad) oo tallaalka cudurka dabaysha ah. Taasi dhibaato ma leh.

Qaangaarka
Badi dadka qaangaarka ah ee ah 18 jir iyo kuwii ka weyn ayaan u baahnayn cudurka tallaalka cudurka dabaysha maadaama la tallaalay markay ahaayeen carruur. Laakiin dadka qaangaarka qaarkood ayaa halis sarreysa leh oo markaa ah inay tixgaliyaan qaadashada tallaalka cudurka dabaysha:
(1) dadka u socdaala goobaha adduunka ee dabayshu (polio) caadiga ka tahay,
(2) shaqaalaha shey-baarada ee laga yaabo inay faraha la galaan fayraska cudurka dabaysha, iyo
(3) shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee daweynaya bukaannada ee ay dhici karto inay qabaan cudurka dabaysha.

Dadka qaangaarka ah ee ka tirsan saddexdan kooxood:

- aan **waligood laga tallaalin dabaysha** waa inay qaataan 3 qiyaasood oo ah IPV:
  - Laba qiyaasood oo ay u dhexayso 1 illaa 2 bilood, iyo
  - Qiyaas saddexaad oo ah 6 illaa 12 bilood kadib ta labaad.
- kuwa qaatay **1 ama 2 qiyaasood** ee ah tallaalka cudurka dabaysha waa hore waa inay qaataan 1-ka ama 2-da qiyaasood ee ka

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

maqan. Micno ma leh dhererka muddadu intay le'ekeyd laga soo bilaabo markii qiyaasta(ha) tallaaalka la qaatay.

- kuwa qaatay **3 ama in ka badan qiyaasood** oo ah tallaalka cudurka dabaysha waa hore waxa laga yaabaa in la siiyo qiyaas xoojin ah oo ah IPV.

Dhakhtarkaaga ayaa macluumaad dheeraad ah kaa siin doona.

4 Dadka qaar waa inayna helin tallaalka IPV ama waa inay sugaan.

Dadkani ma aha inay qaataan IPV:

- Qof kasta oo xasaasiyad ama diidmo nafta-halis galisa u leh wax kasta oo uu ka kooban yahay IPV, oo ay ka midka yihiin antibatootikada neomycin, streptomycin ama polymyxin B, waa inayna qaadan tallaalka. U sheeg dhaqtarkaaga haddii aad leedahay xasaasiyado ama alerjiyo daran.
- Qof kasta oo dareen-celin ama alerjiyo daran ku yeeshay tallaal hore oo cudurka dabaysha ah ma aha inay qaataan mid kale.

Dadkani waa inay sugaan.

- Qof kasta oo in yar ama si daran u jirraysan wakhtiga ballanta tallaalka loo qabtay sida caadiga ah waa inay sugaan illaa ay roonaanayaan kahor inteyna qaadan dabaysha tallaalkeeda. Dadka qaba xanuunka sahlan, sida dureyga, waa la tallaali karaa.

Waxaad macluumaad dheeraad ah weydiisaa dhakhtarkaaga.

5 Waa maxay halista ka iman karta IPV?

Dadka qaarkood ee qaata IPV ayaa meel damqata ku yeesha barta laga duray. IPV horay looguma aqoon inuu sababo dhibaatooyin daran, oo dadka inta ugu badan kuma yeeshaan dhibaatooyin haba yaraatee.

Hase yeeshee, daawo kasta ayaa keeni karta dhibaato dhinac-socod ah, sida dareen-celin ama alerji daran ama xitaa dhimasho. Halista in tallaalka dabaysha (polio) ka timaado oo uu sababo waxyeelo daran, ama dhimasho, waxaa weeye mid aad u yar.

6 Maxaa la samaynayaa haddiiba ay jirto dareen-celin dhedhexaad ah ama daran?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?

- U fiirso xaaladda aan caadiga ahyn, sida dareen-celinta ama alerjiga daran, qandhada sare, ama dhaqanka aan caadiga ahayn.

Haddii dhibaato alerji daran dhacdo, waxay dhacaysaa dhawr daqiiqadood gudahood illaa saacad kadib tallaalka. Calaamadaha halista ah ee dhibaato xasaasiyad daran waxaa ka mida neefta oo ku qabata, tamar daro, xabeebasho ama hiinraag, wadnaha oo degdeg kuu garaaca, xasaasiyad jidhka ah, dawakhaad, dhiig cadaad, ama cuno-barar.

Maxaan sameeyaa?

- **Wac** dhakhtar, ama dhakhtarka u gee qofka isla markiiba.
- **U sheeg** dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo waqtiga ay dhacday, iyo markii tallaalka la qaatay.
- **Waxaad** dhakhtarkaaga ka codsataa in uu warbixin ka gudbiyo dareen-celinta isagoo buuxiyana warqadda Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS).

  Ama waxaad buuxin kartaa warbixintan adiga oo u sii marinaya VAERS barteeda internetka ee ku taal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

  VAERS ma bixiso talo caafimaad.

7 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (National Vaccine Injury Compensation Program) (VICP) waxaa la abuuray gudihii 1986.

Dadka rumaysan inuu tallaal waxyeello u geystay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysto cabasho iyagoo wacaya **1-800-338-2382** ama booqanaya websaaydka VICP **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

8 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan u ogaan karaa?

- Weydii dhakhtarkaaga. Waxay ku siin karaan xirmo qoraal oo ku saabsan tallaalka ama kugula talin karaan ilo kale oo aad macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafaddaada ama gobolkaaga.
- La Xidhiidh Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama booqo barta internetka ee CDC oo ku taal **www.cdc.gov/vaccines**

Vaccine Information Statement (Interim)

Polio Vaccine

11/8/2011 Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Immunization Action Coalition